SKV 721 edition 6 (Somali) 2017

# Kaarka aqoonsiga waxaa loogu talagalay qofka ka diiwaangalsan dalka Iswiidhan

Swedish Tax Agency


Laga bilaabo sebteember 2017 wuxuu kaarka aqoonsiga ee Xafiiska canshuuraadku u ekaanayaa sidan:




Kaararka aqoonsi ee Xafiiska canshuuraadku bixiyey inta u dhaxeysay maarso 2013 iyo sebteember 2017 waxey u eg yihiin sidan.




Kaarka aqoonsiga oo la suubiyay inta u dhaxeysay 2009 iyo maarso 2013 waa la isticmaalikara ilaa maalinta ugu dambeyn ku qoran kaarka.




Kaarka aqoonsiga waxaa laga dalban karaa Hey'adda cashuuraha. Buugaan yarka ah waxaad ka aqriso kartaa qofka dalban karo kaarka aqoonsiga, sida aad u isticmaaleysid iyo sida aad u dalbaneysid.

Warbixin kale waxaad ka heli kartaa www.skatteverket.se

# Yaa dalban karo kaarka aqoonsiga?

Qofkii ka diiwangalsan dalka Iswiidhan oo buuxiyay 13 sano wuxuu ka dalban karaa kaarka aqoonsiga Hey'adda cashuuraha. Waa in aad isku xaqiijin kartaa qof ahaantaada, taas oo laga wado in aad caddeyn kartid qofka aad tahay. Qiimaha lagu dalbanaayo kaarka aqoonsiga waa 400 oo karoon. Koow waa in aad bixisay lacagta aad ku dalbaneyso kaarka intaanan imaan mid ka mid xafiisyaha kaarka aqoonsiga dhiiba. Haddii aad 18 sano ka yar tahay waa in aad heeysatid ogolaanshaha qofka masuulka kaa ah si aad u heshid kaarka aqoonsiga. Haddii aad heeysatid labo qof oo mas'¨¨uul kaa ah waa in labadoodu ogolaanshaha dhiibaan.

# See baad u isticmaaleeysaa kaarka aqoonsiga?

Waxaad u isticmaaleeysaa kaarka aqoonsiga si aad u xaqiijisid sanadkaada iyo si aad isu caddeeysid qofka aad tahay, tusaale ahaan markii aad daawo ka doonaneysid farmashiyaha, ama markii aad tukaanka lacagtaada kaarka ku baxsaneysid ama markii aad bangiga aadid.

Hey'ado badan, degmooyin iyo shirkado badan waxeey heystaan isticmaalka howlaha elegtroniga oo shuruud u ah in aad shabakadda internetka iska caddeysid. Sababtaas oo ah uu kaarka aqoonsiga u wataa caddeyn internetka oo aad u isticmaali kartid in aad isku caddeysid elegtronig ahaan iyo saxiixaada. Ka aqriso aqoonsiga elegtroniga iyo isticaalka howlaha elegtroniga Telia baalkooda internetka, **www.telia.se**.

Uma isticmaali kartid kaarka aqoonsiga beddelka baasaboorka markii aad wadamaha kale u safreeysid. Kaarku wuxuu shaqeeynayaa shan sano.

# Sidee baad u dalbaneeysaa kaarka aqoonsiga?

Sidaan baad u dalbaneeysaa kaarka aqoonsiga:

## 1. Horey u bixi lacagta aad ku dalbaneysid

Qiimaha lagu dalbanaayo kaarka waa 400 oo karoon. Waa in aad waqti fiican horey u bixisaa, si aan lacagta u helnay inta aadan imaanin xafiiska Hey'adda cashuuraha. Waxaad xusuusnaataa in eey qaadaneyso ugu yaraan hal maalin oo maalmaha shaqada ah inta eey lacagta naga soo gaareyso. Meel dhigo rasiidka oo aad ku bixisay lacagta sababta oo ah waa in aad na tustaa markii aad timaadid xafiiska.

Waxaad lacagta ku bixisaa Bangigiiro 389-0100.

Haddii aad internetka lacagta kaga bixisid: Xusuuso in aad ku qortid tobanka lambar ee caddeyneeysa dhalashadaada meesha fariinta. Tusi rasiidka ama warqadda caddeynta aad kala soo baxday internetka markii aad timaadid xafiiska.

Lacagta waxaa aad u bixineysaa in eey Hey'adda cashuuraha fiiriyaan codsigaada. Micnaheedu waxaa weeye in aan lacagtaada laguu soo celin karin haddii eey tijaabinta Hey'adda casshuuraha keento in oo laguu diido dalabkaada.

## 2. Booqo mid ka mid xafiisyaha oo bixiya kaarka aqoonsiga

Si aad u codsatid waa in aad tagtaa mid ka mid xafiisyaha oo bixiya kaarka aqoonsiga. Booqoshadaas aad na soo booqaneysid waa in aad wadataa waraaqada caddeynta oo aad ku bixisay lacagta aad ku dalbaneyso kaarka. Haddii aadan na tusi karin in aad lacagta horey u bixisay dalabkaaga ma'aan fiirin karno. Qofkii ka yar 18 sano waa in uu la'socdaa ugu yaraan hal qof oo mas'uul ka ah.

Xafiiskasta ma' uu bixiyo kaarka aqoonsiga. Warbixinta oo kuu sheegeysa xafiisyaha bixiya kaarka aqoonsiga waxaad ka heli kartaa baalka webbka aan ku leenahay www.skatteverket.se. Waxaad kaloo wici kartaa Hey'adda cashuuraha talefoonka 0771 567 567.

### Warqadda foomka oo elegtroonig ah

Xafiiska waxaad ku buuxisaa foomka oo elegtroonig ah oo aad ku dalbaneysid kaarka aqoonsiga. Warbixintaada waxaan ka baareynaa diiwaankeena. Marka uma baahnid warqadda caddaynta qofka.

## 3. Caddey qofka aad tahay

Marka aad xafiiska timaadid waa in aad xaqiijisid qofka aad tahay. Siyaabo kala duwan baad arrintaas ku suubin kartaa:

- In aad tustid waraaqad ku caddeyn ah oo ansax ah och la aqbalay
  ama
- In aad u ogolaatid Hey'adda canshuuraha in ay isbarbardhigaan warbixintaada aad siisay warbixinta ay haystaan Laanta socdaalka
  ama
- In aad soo kaxeysatid qof oo qoraal ahaan caddeyn karo warbixinta ku khuseeyso ee la xiriiro foomka oo foomkana saxiixo,– caddeyn bixiye.
  ama
- In aad noo ogolaatid in aan samayno qiimeyn si wadajir ah loo miisaamay.

### Waraaqaddaha aqoonsiga oo la aqbalikaro

Waraaqaddaha aqoonsiga oo la aqbalikaro oo aad ku xaqiijin kartid qof ahaantaada waa kuwaan soo socda:

- Kaar aqoonsi ah oo hey'adda cashuurta bixisay
- Baasaboor Iswiidhish ah oo galkiisa guduudanyahay
- Kaar aqoonsiyeed oo qaranka iswiidhen
- Kaarka wadista gaadiidka oo iswiidhish ah
- Kaar aqoonsiyeed oo SIS calamadeeysan oo iswiidhish ah oo eey bixiyeen, tusaale ahaan, bangi, shirkad, hey'add ama boostada iswiidhishka ah
- Kaar shaqaalo (oo anan heysan calaamadda SIS) oo eey bixiyeen hey'add dowladeed oo kale

Intaas waxaa sii dheer baasaboor yurubiyyan ah oo bilaabanaayo 1 Sebtembar 2006 oo ansax ah, waa waraaqad caddeyn ah oo aad isticmaali kartid marka aad xaqiijineysid qofka aad tahay. Baasaboor yuruubiyyan ah waa baasaboor ay bixiyeen wadamada kale ee yurub ku yaala oo ku koobayan wadajirka qaraarka EG 2252/2004. Taas macnaheeda waxeey tahay waa in uu buuxiyo shuruudaha ammaanka. Baasaboor yurubiyan ah waxaad ku aqooneysaa:

- Baasaboorka galkiisu guduudanyahay iyo qoraalka Ururka yurubiyaanka (luuqadda ay doonto ha ahaatee) ugu qorantahay baalka hore.
- Wuxuu leeyahay calaamad baayomeetriga ah (fiiri sawirkaan). Taas micnaheedu waa in uu leeyahay kaar yar oo leh baayomeetrig warbixin ah oo qofka ku saabsan, taas waxa weeye in uu leeyahay sifooyin qofka u gaar ah sida qofka farihiisa oo kale




Baasaboor ay bixiyeen wadamaha Islandiya, Leichtenstein, Noorwaay ama Swizerland laga bilaabo 1 sebtembar 2006 waxay heystaan shuruudaha ammaanka sida baasaboor yurubiyan ah oo kale, sidaas daraadeed bay iyaguna u yihiin waraaqad caddeyn ah.

## Sharciga degganaanshaha

Laga bilaabo 1 oktoobar 2010, qofkii sharciga degganaanshaha Iswiidhishka ah haysto, laakiin aanan ku caddeyn karin qofka uu yahay oo aanan keeni karin dokumenti ansaxan, wuxuu u oggolaan karaa Hey'adda canshuuraha in ay isbarbardhigaan warbixinta khuseeyo qofka oo ay haystaan Laanta socdaalka iyo warbixinta khuseeyo qofka oo uu keensaday qofku. Warbixinta aan isbarbardhigeyno waa magaca qofka, dhiririka, masawirka, saxiixa, qoraalaha safarka iyo caddeynta sharciga degganaanshaha. Sababtaas bay u fiicantahay inaa soo wada qaadatid baasaboorkaada iyo caddeyntaada sharciga degganaanshaha. Haddii aadan heysan baasaboor waxaa kaliya soo qaadataa caddeyntaada sharciga degganaanshaha. Haddii aad rabtid in aad habkaan ku xaqiijisid qofka aad tahay, waa in aad noo sheegtaa adiga xilliga aad dalbaneysid kaarka aqoonsiga.

## Caddeyn bixiyaha

Caddeyn bixiyaha waa qof si fiican kuu yaqaano oo caddeyn karo xiriirka inka dhaqeeyo. Caddeyn bixiyaha waa in uu 18 buuxiyay oona xaqiijin karaa qofka uu yahay isaga oo isticmaalayo dokumenti aqoosi oo ansaxan. Dadkaan soo socda mid ka mid ah baa noqonkaro caddeyn bixiye:

- Xaaskaada, ama qofka kula diiwangalsan
- Carruurtaada ama carruurtaada carruurtooda oo 18 sano gaaray
- Waaridkaaga/qofka mas'uuliyadaada haayo

- Walaal kula dhashtay oo hal ama labaddada waarid dhaleen oo 18 sano buuxiyay
- Waaridka hooyadaa ama aabahaa

Qofka aad la nooshahay marka loo eego sharciga qofka kula nool wuu noqon karaa caddeyn bixiye. Adiga iyo sharci bixiyahaadda si la inkugu oqoonsaddo dad isla nool waa in aad isla daggantihiin oo carruuurna inka dhaxeeyso. Arrintaas waxaa caddeynkara in aad isla daganeeydeen ugu yaraan lix bilood.

Ugu dambeystii dadkaan soo socdo weey noqon karaan caddeyn bixiyeyaal hadii eey soo qaataan qaraar ama caddeyn oo tusineysa xiriirka inka dhaxeeya:

- Qof ku maamule ama mas'uul kaa ah
- Waalid ka yimid guriga lagu daryeelo carruurta
- Shaqaalaha degmada ama shaqaalaha hey add dowladeed oo xiriir shaqo inka dhaxeeyo, tusaale ahaan, xooghayaha bulshada, qofka ku siinaaya warbixinta waddanka marka aad cusubtahay, qofka gacanhayaha kuu ah jaamacadda aad dhigatid ama mid la mid ah
- Shaqo-biyiyahaaga oo aad u shaqeeyneysay ugu yaraan hal sano

## Qiimeyn si wadajir ah loo miisaamay

Haddii aadan hubin in aad buuxisay shuruudaha iyo in kale waad dhiibi kartaa foomkaada si kastaba. Hey'adda cashuuraha waxey qiimeyn ku suubindoontaa warbixintaada oo aad foomka ku qortay, tusaale ahaan, haddii xiriir addiga iyo qof kale inka dhaxeeyay dhamaaday, ama baasaboor ajanabi ah. Haddii aan u baahano warbixintaada hey'addo kale aan wareeysaneynaa, ama waxaan ku weydiin karnaa haddii aan u baahano in aad foomkaada warbixin kale ku dartid oo caddeyn kara qof ahaantaada.

# Sawirid iyo cabirka dhirirka

Xafiiskeena waxaan ku cabirnaa dhirirkaada, sawirka ku oolaayo kaarkana waan qaadnaa. Marka ha soo qaadanin masawir.

# Dhameystiridda haddii eey wax maqanyihiin

Haddii uu foomkaada dhameystirneyn waa in aad ku buuxisaa waxa kaa maqan. Taasu waxeey sababi kartaa inn aad mar labaad booqato xafiiskeena.

# Siddee baad u heleysaa kaarka aqoonsiga oo diyaarka ah?

Caadi ahaan wexeey qaadaneysaa labo isbuuc inta uu kaarka aqoonsigu diyaar ka noqonaayo. Haddii ay noqoto in foomkaada wax ku jiro in la baaro waqtiga aad kaarka ku heleysid baa dheeraan karo.

Markii uu kaarka aqoonsigu diyaar noqdo warqad ka socoto Hey'adda cashuuraha baad heleysaa. Kaarka waxaad ka doonan kartaa xafiiskii aad kaarka ka dalbatay. Warqadda kuu soo dhacdo keeydso oo soo qaad markii aad kaarka soo doonaneysid.

# Haddii aadan helin kaar aqoonsi

Haddii aadan kaarka helin wexeey ku xirantahay in aadan shuruudihii lagaa rabay in buuxin. Haddii aad u aragtid in aad xaq u leedahay in aad heshid kaarka aqoonsiga Hey'adda cashuuraha go'aankooda baad ka dacwoon kartaa. Dacwadaas si aad u suubin kartid waa in aad dacwo dheerad ah wax la yirrahdo u dirtid Hey'adda cashuuraha. Hey'adda cashuuraha dacwadaada dheeraadka ah wexeey u diraayaan maxkamadda idaarada, oo markaas go'aan ka gaareyso haddii eey Hey'adda cashuuraha saxsanyihiin ama qaldanyihiin.

# Haddii uu kaa dhumo kaarkaada aqoonsiga

Haddii uu kaa dhumo kaarkaada aqoonsiga waa in aad isla markii wacdid taleefoonka 020-32 32 62 oo isla markaas xiraya kaarka si uusan qof kale u isticmaali karin. Haddii kaarka aqoonsiga lagaa xado waa in aad booliiska wargelisaa.

Swedish Tax Agency

SKV 721 edition 6 (Somali). Issued in September 2017.
This edition is only to be found as a PDF file at www.skatteverket.se.